Seattle Department of Education & Early Learning

# Canshuurta Cabbitaannada Macaan ee Magaalada Seattle (SBT)
# Barnaamijka Deeqaha Bulshada ee shaqsiyaadka ku jira Dhalmada ka hor ila Dada sedex Sano
# Waraqdda wehelisa soo koobida**RFP**

## HORDHAC

Waaxda Waxbarashada iyo Waxbarashada Hore (DEEL) waxay codsanaysaa soo jeedinta ururada bulshada ku salaysan (CBOs) ee xiisaynaya bixinta adeegyada si loo horumariyo natiijooyinka caafimaadka iyo waxbarashada shakhsiyaadka ku jira mudada dhalmada ka-hor- ila saddex sano.

Ku dhawaad **$1.49** milyan dollars ayaa loo heli karaa maalgashigan **2025-2027**. Hay'adaha xaqa u leh waxay soo gudbin karaan hal hindise oo codsanaya ugu badnaan **$149,000** sanadkii wadar ahaan **$298,000** muddo laba sano ah. Maalgelinta waxaa lagu abaalmarin doonaa habka Codsiga Soo jeedinta (RFP) ee ay maamusho Waaxda Waxbarashada iyo Waxbarashada Hore ee Magaalada Seattle (DEEL). Deeqaha Bulshada ee PN-3 RFP waxa ay raadisaa soo jeedinta **saddex** meelood oo diirada la saaray:

1. Dhalashooyin caafimaad-qaba oo loo siman yahay
2. Caafimaadka Dhalmada ka hor iyo Ladnaanta Dareenka
3. Daryeel jawaabi-og oo kobciya

DEEL waxay mudnaan siinaysaa maalgelinta Ururada beesha (CBOs) ee leh hadafyo ay ugu adeegaan waalidiinta, daryeelayaasha iyo/ama mas'uuliyiinta carruurta da'doodu tahay dhalashada ilaa saddex sano ee gudaha Magaalada Seattle iyaga oo si gaar ah u danaynaya gaaritaanka dadka mudnaanta leh, oo lagu qeexay bulshooyinka midabka, muhaajiriinta, qaxootiga, dadka dakhligoodu hooseeyo, iyo bartayaasha Ingiriisiga. Soo jeedinta guuleysata waxay heli doontaa laba sano oo maalgelin ah.

## U-qalmitaanka iyo maalgelinta

Si aad ugu qalanto maalgelinta iyada oo loo marayo RFP, soo jeediyeyaashu waa inay ahaadaan mid ka mid ah kuwaan soo socda:

- Urur aan faa'iido doon ahayn (ama dhaqaale ahaan uu kafaalo qaado urur) ah 501(c) 3 ah (oo ay ku jiraan ururada bulshada ama caqiidada ku salaysan)
- Ururada bulshada ama wada shaqaynta aan lagu darin faa'iido-doon ahaan, sida iskaashiga bulshada, isbahaysiga iyo/ama kooxaha kale ee xidhiidhka, waa in ay isku aqoonsadaan kafaala-qaade maaliyadeed oo buuxiya shuruudaha qandaraaska ee Waaxda
- Qabiilada iyo hay'adaha qabiileed

Intaa waxaa dheer, Codsadayaashu waa in ay siiyan adeegyo ka qaybgalayaasha deggan gudaha xadka magaalada Seattle.

**Maalgelintan looguma talagelin in loo isticmaalo adeegyada horay loogu maalgaliyey doolarka kale ee dadweynaha.**

Mashruucyada <u>aan</u> u qalmin fursadan deeq-lacageedka waxaa ka mid ah kuwa:

- Bixiya taageerooyin tayo leh ama kaba Xanaanada daryeelka ilmaha ee shatiga leh

Seattle Department of Education & Early Learning

- Kuwa keliya diiradda saara taageeridda hawlaha guud ee urur
- Kuwa aan diiradda saarin dhalmada ka hor ilaa da'da-saddexda Sano
- Kuwa ku hawlan ololayn siyaasadeed
- Kuwa hadda lagu maalgeliyey Deeqaha Bulshada PN3 ee 2024-2026

## JADWALKA HAWLAHA

| Dhacdo | Taariikhda/Waqtiga |
|---|---|
| **Codsiga Soo-jeedinta (RFP) wuxuu furmayaa** | **Ogosto 11, 2025** |
| **Kulanka macluumaadka RFP (horay loo duubay)** | **Ogosto 11, 2025** |
| **Muddada kaalmada farsamada ee qof qofka ah** | **Ogosto 11, 2025, illaa Sebtembar 2, 2025, ballan** |
| **Muddada su'aalaha iyo jawaabaha** | **Ogosto 11, 2025, illaa Sebtembar 2, 2025** |
| **Waqtiga kama-dambeystaa ee la soo gudbinayo Soo-jeedinta** | **Sebtembar 8, 2025, markay tahay 11:59 PM** |
| **Dib u eegista Codsiga, Dhibcaha iyo Ka-tashiga** | **Sebtembar 9, 2025, illaa Sebtembar 30, 2025** |
| **Goorta geysiisyada La Siinayo Codsadayaasha** | **Oktoobar 2025*** |

***Taariikhda iyo waqtiyada waa la bedeli karaa***

## Caawinta Farsamada ee BULSHADA KU SALAYSAN EE SOO-JEEDINTA LOOGU TALAGALAY

Kaalmo farsamo oo bilaash ah, toos ah (Technical Assistance) ayaa diyaar u ah inay ka caawiso bixiyeyaasha inay horumariyaan soo-jeedintooda waxaana bixinayo la-taliyayaal-bulshada ku salaysan oo khibrad leh. Waxaan si adag u dhiirigelinaynaa ka faa'iidaysiga kaalmada farsamo si loo taageero horumarinta soo jeedintaada, waafajinta mudnaanta **RFP-** gan iyo taageerada dib u eegista hagidda farsamada ee RFP. Si aad u isticmaasho taageerada farsamada, fadlan xor u noqo inaad la xidhiidho la taliyaha hoos ku taxan.

| Bixiyaha TA (Technical assistance) | Taariikhda iyo Xiriirka |
|---|---|
| Xasan Wardheere | Xasan Wardheere wuxuu ku takhasusay maamulka mashaariicda, ka qaybgalka bulshada dhabta ah, kobcinta awooda, maaraynta isbadalka, qorshaynta istiraatijiyadeed iyo iskaashiga, kaalmada farsamada, iwm. Xasan waxa uu adeegsadaa istaraatijiyad gaar ah oo lagu qiimeeyo dhaqamada guriga marka uu taageerayo horumarinta fikradaha istaraatiijiyadeed, naqshadaha guuleysta iyo is dhexgalka hal-abuurka ee barnaamijyada iyo adeegyada sinnaanta horseedka u ah oo shaqsiyeysan. Waxa kale oo uu khibrad dheer u leeyahay la shaqaynta ururada bulshada ee u adeega qoysaska soogalootiga iyo qaxootiga.<br>La xidhiidh: hassan@bulleconsulting.com |

## TAAGEERADA LUUQADDA

Haddii aad u baahan tahay taageero luqadeed oo dheeri ah, DEEL ayaa ku siin karta kaalmo. Fadlan la xiriir **DEEL Funding at DEELfunding@seattle.gov**.

Seattle Department of Education & Early Learning

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Faahfaahinta buuxda ee barnaamijka deeqda waxa lagu qeexay Codsiga Soo jeedinta Codsiga Deeqaha Bulshada ee dhalmada ka hor ilaa Saddex Sano. Dhammaan macluumaadka iyo dukumeentiyada codsiga ee barnaamijka deeqda waxaa laga heli karaa bogga DEEL ee fursadaha maalgelinta: http://www.seattle.gov/education/for-providers/funding-opportunities